

Lacagsiinta Shaqaalaha safka hore ee Minnesota

Ku saabsan

Si loogu mahadceliyo dadka reer Minnesota ee ka shaqaynayay safka hore intii lagu xaalada degdega ah ee xilliga nabada ee COVID-19, ayaa Gov. Tim Walz wuxuu saxiixay sharci Abriil 29, 2022, kaasoo awood u siinaya shaqaalahaas inay dalbadaan Lacagsiinta Shaqaalaha Safka hore. Faahfaahinta barnaamijka, oo ay ku jiraan nidaamka howlgelinta arjiga iyo wakhtiga, ayaa ku jira khadka internetka ee ah frontlinepay.mn.gov. Soo booqo websaydka si aad isu diiwaangeliso si aad u hesho wararka ugu dambeeyey ee ku saabsan lacagsiinta shaqaalaha safka hore.



Ayaa u qalma

Marka hore waxa jira laba qaybood oo ah cidda xaqa u leh in ay codsadaan: shuruudaha shaqada iyo shaqada waaxda/nooca shaqada.

Shuruudaha shaqada

Si uu xaq ugu yeesho Lacagsiinta Shaqaalaha Safka hore, codsaduhu:

- waa in aad shaqaynaysay ugu yaraan 120 saacadood Minnesota hal mid ama wax ka badan oo ah waaxaha safka hore intii u dhaxaysay Maarso 15, 2020, iyo Juun 30, 2021;
- saacadaha uu shaqeeyay muddadan codsadduhu -
 - waa in uuna awoodin in uu guriga ku shaqeeyo sababo la xiriira nooca shaqada qofka iyo
 - waana in uu ku shaqeeyay meel u dhow dadka ka baxsan qofka qoyskiisa;
- waa in aad buuxisay shuruudaha dakhliga ugu yaraan mid ka mid ah sannadaha cashuuraha ee 2020 ama 2021
 - shaqaalaha leh masuuliyada daryeelka tooska ah ee bukaanka COVID-19 waa inay lahaadaan dakhliga guud ee la hagaajiyay* oo ah wax ka yar \$350,000 cashuur bixiyayaasha xaaska ah ee si wadajir ah u xaraysanaya, ama in ka yar \$175,000 dadka si kale u xaraysta.
 - shaqaalaha ku jira shaqooyinka ayna lahayn masuuliyadaha daryeelka tooska ah ee bukaanka COVID-19, xaddidka dakhliga guud* ee la hagaajiyay waa \$185,000 cashuur bixiyayaasha xaaska ah ee si wadajir ah u xaraysanaya, ama \$85,000 dadka si kale u xaraysta.
- waana in aadan helin lacagta nacfiyada caymiska shaqala'aanta in ka badan 20 toddobaad marka la isku daro toddobaadyada u dhexeeya Maarso 15, 2020, iyo Juun 26, 2021.

*Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dakhliga guud ee la hagaajiyay:

[irs.gov/e-file-providers/definition-of-adjusted-gross-income](https://www.irs.gov/e-file-providers/definition-of-adjusted-gross-income).

Noocyada shaqada

1. adeegyada dhismaha, oo ay ku jiraan dayactirka, nadaafada iyo amniga;
2. daryeelka Caruurta;
3. maxkamadaha iyo asluubta;
4. gurmada xaaladaha degdega ah;
5. adeega cuntada, oo ay ku jiraan wax soo saarka, habaynta, diyaarinta, iibinta iyo keenista;
6. adeegyada gaadiidka ee dhulka iyo cirka;
7. daryeelka caafimaadka;
8. daryeelka muddada dheer iyo ku daryeelka guriga;
9. wax soo saarka/warshadaha;
10. caafimaadka dadweynaha, adeega bulshada iyo adeega maamulka;
11. gadiidka dadweynaha;
12. tafaariiqda, oo ay ku jiraan iibinta, buuxinta dalabyada, qaybinta iyo u gaynta;
13. iskuulada, oo ay ku jiraan iskuulada charter-ka, dugsiyada gobolka iyo tacliinta sare;
14. shelterada iyo huteelada ku meel gaarka ah; iyo
15. tababarka farsamada gacanta.

Meesha laga dalban karo

Kadib marka arjigu uu diyaar noqdo, shaqaalaha xaqa u leh waxay haysan doonaan 45 maalmood si ay uga codsadaan Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore [frontlinepay.mn.gov](https://www.frontlinepay.mn.gov). Booqo websaydka si aad u hesho khayraad muhiim ah, sida jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiiyo, qoraalo wargelin ah oo luuqado badan ku qoran, muuqaalo kooban oo ku saabsan sida dalbado iyo waxyaabo kale oo badan.

Caawimada codsiga

Kadib marka arjigu uu diyaar noqdo, xarunta wicitaan iyo miiska caawinta ayaa sidoo kale diyaar u noqon doona inay ku caawiyaan codsabayaasha luqado badan.

Lacag Siinta

Kadib howlgelinta iyo xaqiijinta arjiyada, iyo sidoo kale muddo 15 maalmood ah oo loogu talagalay codsabayaasha loo diiday inay ka doodaan go'aamadaas, liiska kama dambaysta ah ee codsabayaasha xaqa u leh ayaa la go'aamin doonaa. Codsabayaasha u qalma waxaa la siin doonaa lacag isku mid ah. Arjiyada oo dhan waxay ku gudbi doonaan nidaamka isku mar ah waxaana loo gudbin doonaa lacag bixinta si wadajir ah.

Ogeysiis: Warqadani waa guudmar kooban oo sharciga Minnesota ah. Waxaa loogu talagalay in ay ahaato hage ahaan mana aha in loo tixgeliyo in ay beddesho Xeerarka Minnesota ee ku saabsan Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore.